




Bxusuusin Ku Saabsan Ku Noqoshada Iskuulada: “Minnesota Education Credit and Subtraction”

Xafido rasiidyada aad ku iibsatay Qalabka iskuulka, una isticmaal in lacag laguugu Soo celiyo markaad xeraynaysid canshuurta!

Lacagta Waxbarashada Canshuurta Lagu Soo Celiyo Ama Lagu Yareeyo Ee Minnesota

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay is gobolka Minnesota lacag canshuurta ah kuugu soo celiyo waxbarashada carruurtaada. Carruurta kharashka waxbarashadooda lagu soo celinayo waa kuwa dhiganaya xanaanada carruurta illaa dugsiga sare. Lacagta ugu badan ee lagu soo celinayo waa \$1,000 ilmihiiiba, tani waxay kaloo ku xirantahay dakhliga qoyska.



Qofkasta dakhliguu doono ha sameeyee wuxuu kharashka carruurta u isticmaali karaa inuu canshuurta isaga yareeyo “subtraction.”

Si lacagta laguugu soo celiyo ama canshuurta lagaaga dhimo, waa inaad haysatid rasiidka aad carruurta ugu soo iibisid alaabta iskuulka sida buugaagta, qalimaanta, kalkulaytarka iwm. Waxaad kaloo soo gudbin kartaa kharashka kaaga baxa gaadiidka, casharada dheeriga ah ee ilmaha gaarka loo siiyo iyo barnaamijyada ilmuhu ka qeybgalo marka iskuulku dhamaado iyo xilliga xagaaga. Sidoo kale waxaad soo gudbin kartaa kharashka waxbarasho ee kumbuyuutarada (illaa \$200) ku baxa.

Si aad lacagtaa u heshid “credit”, waa inaad buuxisaa foomka “Schedule M1ED” markaad buuxinaysid canshuurta gobolka ee “Minnesota State Tax Form,” si aad u dalbatid in canshuurta lagaa yareeyo “subtraction,” waa inaad buuxisid foomka “Form M-1.” Xusuusnow waa WAA KHASAB inaad foomamkaas kusoo lifaaqdid dhamaan rasiidyada.

Wixii akhbaar dheeraad ah iyo siyaabaha kale ee lacag xaga canshuurta ah laguugu soo celin karo, fiiri websaydka www.taxes.state.mn.us dabadeed baar “search” kalmadaha “Education Credit and Subtraction.”

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma’aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto.

Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2018 Minnesota Legal Services Coalition. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo daabaco, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.